



**WAR-SAXAAFADEED**


**Muqdisho**, 27-11-2020, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay cambaareyneysaa falkii waxashnimada lahaa ee argagaxisadu ay caawa ku bartilmaamadsadeen shacabka Soomaaliyeed ee aan waxba galabsan.

Ugu yaraan 6 muwaadiniin Soomaaliyeed ah ayaa ku dhintay weerarkaasi halka 8 kalana ay ku dhaawacmeen sida uu xaqiijiyay taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Wasiirka Warfaafinta, Cismaan Abokor Dubbe ayaa tacsii u diray Qoysaskii ku waayay Ehelkooda Weerarkaasi Argagixisanimo. Isagoona kuwa dhaawaca ahna ballanqaaday in Dowladdu ay garab istaagayso.

Falkaan arxan darrada ah waxuu caddeyn u yahay sida kooxahan calooshood u shaqeystayaasha ah ee ka macaasha daadinta dhiigga shacabka Soomaaliyeed ay mar kasta ugu hamuun qabaan baabi'inta dadka si aan kala sooc laheyn.

Dowladda oo kaashaneysa shacabka Soomaaliyeed waxay ku reja weyntahay in guul laga gaaro dagaalka lagu soo afjarayo kooxaha argagixisada ah, diin laawayaasha ah ee danta ka dhex arkay burburinta dalka iyo baabi'inta ummadda Soomaaliyeed.



**DHAMAAD**